SO



Macluumaadka Kowaad – Warqadda macluumaadka Qaxootiga

Flüchtlingsrat
Sachsen-Anhalt e. V.

Qoraalkan wuxuu soo bandhigayaa si guud mar ah habka magangelyada ee Jarmalka. Waxa loogu talogalay dadka magangalyo-doonka ah ee gaadhay Sachsen-Anhalt taas oo sheegaysa sharciyadda aasaasiga ah ee ugu muhiimsan. Wixii faahfaahin dheeraad ah waxa wanaagsan in aad la xidhiidho xarumaha warbixinta ama qareenada. Xidhiidhada xarumaha warbixinta waxa laga heli karaa halkan hoose: www.fluechtlingsrat-lsa.de./adressen-und-beratungsstellen/.

1. GURYEYNTA IYO DARYEELKA INTA LAGU JIRO HABKA MAGANGELYADA

Yaa mas'uul ka ah guryeynta iyo daryeelka kadib marka aan imaado Sachsen-Anhalt?

- Ka dib marka la qoondeeyo gudaha Jarmalka, maamul gobolkeedka Sachsen-Anhalt ayaa mas'uul ka ah guryeyntaada iyo daryeelkaaga. Xarunta dhexe ee soo dhaweynta magangalyo-doonka („Zentrale Aufahmestelle für Asylsuchende, ama ‚ZASt') waxay ku taalaa magaalada Halberstadt. Guryaha kale ee loogu talagalay soo dhawaynta hore waxay ku yaalaan Bernburg iyo Magdeburg (la filayo ilaa 2022). Halberstadt waxa sidoo kale ku yaala laan ay leedahay xafiiska „Bundesamt für Migration und Flüchtlinge „ (BAMF), oo ah Xafiiska Federaalka ee Socdaalka iyo Qaxootiga.

Mudo intee le'eg ayay tahay in aan ku noolaado xerada ugu horaysa?

- Iyadoo ku xidhan kiiska, dadka qaarkii waa in ay joogaan xarunta soo-dhoweynta koowaad ilaa dhamaadka habka magangelyo doonkooda, oo ugu badnaan ah mudo 18 bilood. Hadii kiiskaaga magangelyo la diiday, waa in aad ku noolatid xerada ugu horaysa ilaa inta aad ka tegaysid Jarmalka. Hadii kiiskaaga magangelyo doonka la diido sida „si cad aan sal iyo raad toona lahayn" ama „Aan la ogolaan karin", waa in aad ku sii jirtaa xarunta soo dhoweynta. Dadka qaarkood ayaa laga dhaafi karaa waajibkan:

- Qoysaska leh caruur yar yar.
- Haweenka keligood safraya.
- Dadka xanuunsanya.
- Dadka soo maray rabshado.
- Diimaha ama qowmiyadaha laga tirada badanyahay.
- LGBTIQ * (khaniisiinta, jinsiga ama kuwa kale).

Dadkaas iyo kooxuhuba waxay ka guuri karaan xarunta soo dhaweynta una guuri karaan meelaha kale ee Sachsen-Anhalt lix bilood ka dib. Hadii aanad fulin waxa loogu yeedho „waajibaadka ka qeybqaadashada" (Mitwirkungspflicht).Waxa suurtagal ah in aad ku noolaato xerada u horaysa ee qaabilaadda mudo aan xadidneyn.

La xidhiidh xarunta macluumaad maxaliya ama shaqaalaha ZASt. Dadka ka yimid Serbia, Macedonia, Bosnia-Herzegowina, Albania, Kosovo, Montenegro, Ghana iyo Senegal waxa waajib ku ah in ay ku sii jiraan xerada ugu horeeysa ilaa iyo inta kiiskooda magangalyo la go'aaminayo. Ma jiro waqti u xadidan kiisaskaas.

Ma la ii ogolyahay in aan ka baxo xarunta soo-dhowaynta?

Ilaa iyo inta aad ku nooshahay xerada soo dhoweynta kowaad (ZASt), waxa keliya ee laguu ogolyahay in aad tegi kartid meelo xadidan (tusaale ahaan: hadii aad ku nooshahay ZAST Halberstadt, kaliya waxaad tegi kartaa gobolka „Landkreis Harz"). Waa laguu ogolyahay in aad ka baxdo dhismaha ZASt. Xeerkan waxa loo yaqaan „Residenz-Pflicht". Hadii aad jebiso xeerkan waa lagu xayiri doonaa. Hasayeeshee, BAMF waxay awood u leedahay in ay kuu ogolaato in aad ka baxdo goobta xadidan mudo kooban, tusaale ahaan hadii aad haysato balan qareen. Hadii shakhsi ahaan lagaa rabo in aad tagto Hay'adda Ajnabiga („Ausländerbehörde") ama hor tagto maxkamadda, u sheeg shaqaalaha BAMF ama ZASt. ka hel macluumaad ku saabsan goobta kuu xadidan shaqaalaha bulshada ee ZASt ama xarunta macluumaad ee loogu talagalay magangalyo-doonka.

Maxaa khuseeya hadii aanay ahayn in aan ku sii noolaado ZASt?

Hadii aanay ahayn in aad ku sii noolaatid ZASt, waxa laguu qoondeeyn doonaa degmo kale („Landkreis") oo aad ku noolaanaysaa guri ama hoy la wadaago („Gemeinschaftsunterkunft"). Hadii,

sida ku xusan taariikhda aad timid xaqiijinta, aad ku noolayd Jarmalka mudo ka badan sedex bilood, Residenzpflicht-ku ma sii haboonna. Ku eekaanshaha dhuleed waxa lagu amri karaa oo kaliya hadii aad tusaale ahaan gashay dembi ama masaafurintaadu ay cadahay. Si kastaba ha noqotee, waxa waajib kugu ah in aad degto degmada / Landkreis laguu qoondeeyay, ama xataa guri ama hoy. Tan waxa la dhahaa „Wohnsitzauflage". Xaaladdan waa in aad si joogta ah u joogto halkaas oo aad hesho tusaale ahaan boostaada („gewöhnlicher Aufenthalt").

Hadii aad awoodid in aad kafaala qaadid noloshaada (sida hadii aad heshay „Ausbildung" ama shaqo), xafiisku wuxuu kuu ogolaan karaa in aad meel kale degtid. Macluumaad dheeraad ah waxa laga heli karaa cinwaanka „Macluumaadka ku saabsan" Wohnsitzregelung": www.fluechtlingsrat-lsa.de/eigene-publikationen/

2. HABKA MAGANGELYADA

? Maxaa ka dhaca BAMF-ta Halberstadt?

- Dhamaan talaabooyinka habka magangelyada waxa la iskugu keenay Halberstadt: laga bilaabo diiwaangelinta ilaa warqadda ay ku jirto go'aanka BAMF ee ku saabsan kiiska magangelyada („Bescheid"). Shaqaalaha BAMF ayaa kugu diiwaangelin doona xogta iyagoo sawir ka qaadaya fartaada, qaadashada sawiradaada iyo in ay qoraan xogtaada shakhsi ahaaneed. Dhamaan macluumaadkan ayaa lagu kaydin doonaa „Diiwaanka Dhexe ee Dadka Ajnabiga ah". Diiwaangelinta kadib waxa aad heli doontaa warqad xaqiijinaysa in aad diiwaangashantahay in aad timid Jarmalka – „xaqiijinta imaanshaha" ama „Ankunftsnachweis". Kaliya intaas ka dib ayaa waxaad heleysaa balan si loo diiwaangeliyo kiiskaaga magangelyo. Tani waxay ku dhici doontaa qaab wadahadal ku saabsan duulimaadkaaga iyo sababaha duulimaadkaaga („Anhörung" ama „wareysi").

Waa maxay „cadaynta imaanshaha“ („Ankunftsnachweis“) sidoo kale waa maxay ogolaanshaha deganaanshuhu („Aufenthaltsgestattung“)?

„Ankunftsnachweis“ ma aha ruqsad degenaansho dhamaystiran, laakiin waa ogolaansho joogitaan ku meel gaadh ah ee ku noolaanshaha Jarmalka inta kiiska magangelyada la wado. Cadaynta imaanshuhu wuxuu sheegayaa xarunta kowaad ee soo dhaweynta ee mas'uulka ah iyo macluumaad kugu saabsan. Warqadan mudadeedu waa xadidanyahay waana la bedelayaa kadib wareysigaaga ku saabsan sababaha aad u soo carartay (laguna bedelayo ogolaanshaha joogitaanka („Aufenthaltsgestattung“) Tani sidoo kale ma aha ogolaansho joogitaan kama dambeys ah, laakiin waxaad tusi kartaa masuuliyiinta iyo booliska Jarmalka si aad u cadeeysid in laguu ogolyahay in aad ku noolaato Jarmalka ilaa dhamaadka habka magangelyada. Sidaas daraadeed waa in aad mar walba sidatid.

Isla marka aad ka guurto xarunta soo dhawaynta, Ausländerbehörde wuxuu noqon doonaa hay'adda masuulka kaa ah. Aufenthaltsgestattung waxa si joogta ah u cusbooneysiin doona maamulka mas'uulka ah ilaa dhamaadka nidaamka magangelyadaada. Hadii aad lumiso warqadda ama aad rabto in aad saxdo qaar ka mid ah xogaheeda, la xidhiidh hay'adda mas'uulka ka ah.

Dariiqa aan soo maray cawaaqib noocee ah ayay ku yeelanaysaa kiiskayga magangelyo?

Shaqaalaha BAMF waxay ka wareystaan dhamaan dadka magangalyo-doonka ah dariiqa ay usoo mareen Jarmalka waxaanay eegtaa faraha. Hadii dal kale tusaale ahaan mid ka mid ah dalalka Midowga Yurub uu mas'uul ka yahay kiiskaaga magangelyo, BAMF wuxuu ku weydiin doonaa in aad ka baxdo Jarmalka si aad uga codsato magangalyo dowladaas mas'uulka ka ah (taas oo loo yaqaan „nidaamka Dublin“) – kiiskaaga magangalyada waa „mid aan la ogolaan karin“. Sidani hadii ay dhacdo, la xidhiidh xarun macluumaad ama qareen sida ugu dhakhsiyaha badan si aad u hubiso in talaabooyin dheeraad ah la qaadi karo. Waa muhiim in aad si degdeg ah u ficil celisid!

Waxaan leeyahay balan wareysi / „Anhörung“, micnaheedu maxay tahay?

Talaabada xigta waa wareysiga shakhsiga ah ee shaqaalaha BAMF oo ku saabsan sababaha aad u soo qaxday. Waxay ka kooban tahay su'aal weydiin ku saabsan sababaha aad u soo qaxday, iyo su'aalaha ku saabsan dariiqa duulimaadkaaga. Mararka qaarkood su'aal weydiintu way is daba socotaa. Hadii kale, waxa laguugu martiqaadi doonaa balan labaad, taas oo ay tahay in aad u safartid Halberstadt. Xubin ka tirsan shaqaalaha BAMF ayaa si faahfaahsan kuula hadli doona sababaha qaxa iyo taariikhda duulimaadkaaga. Macluumaadkan ayay BAMF ku go'aan qaadanayaan hadii iyo nooca ilaalineed ee ay tahay in aad hesho („Qaxooti“, sida uu qabo Heshiiska Qaxootiga ee Geneva, „ilaalin kabis ah“; ama „mamnuucid qaran ee ku saabsan tarxiilka“).

Inta lagu guda jiro wareysiga waxa (si ku celcelin ah) laguu weydiinayaa su'aalo ku saabsan goobahii hore ee noloshaada, dariiqii safarkaaga ama codsiyada magangalyo ee dalalka kale. Xoogga saar sharaxaad faahfaahsan ee xaaladdaada shakhsi ahaaneed iyo duulimaadkaaga sababo ciqaabid siyaasadeed ama khataro kale. Ka digtoonow oo faham su'aal kasta si sax ah. Hadii aadan si buuxda u fahmin, weydii wixii ku saabsan. Hadii ay kugu adagtahay in aad ka hadasho dhacdooyinka qaarkood, u sheeg qofka ku wareysanaya ee BAMF. Waa in ay tixgeliyaan iyagu. Dhibaatooyinka daran ee caafimaad ama isku buuqsanaanta waxa cadayn doona dhakhtar. Cadaynta dhakhtarka u dhiib BAMF. Hadii aad tahay qof aan qaan-gaadhin ama aad la kulantay cadaadis jinsi ah ama rabshad, waxa suurtagal ah in uu ku waraysto khabiir ku takhasusay arimahaas. Hadii ay suurtagal tahay, u sheeg BAMF wareysiga ka hor.

Warbixin muhiim ah oo ku saabsan wareysiga: Wareysigu waa talaabada ugu muhiimsan ee habka magangelyada. Fadlan si fiican ugu diyaargarow kahor balanta – hadii ay suurtogal tahay adoo helaya caawimada shaqaalaha xarunta macluumaadka ama qareenkaaga. Caritas waxay Halberstadt ku bixisaa „Asylverfahrensberatung“ (talooyinka habka magangelyada) taas oo kaa taageeraysa is diyaarintaada. Markaa kadib waxaad yeelanaysaa fursado kooban oo aad

ku saxeyso waxaad u sheegtay waraysi qaadaha BAMF. Iskhilaafidda, beddellaada aasaasiga ah ama wax ku daridda waxa loo isticmaali karaa in laga shakiyo waxa aad ku sheegtey waraysigaagii.

Waxa aad xaq u leedahay turjumaan. Hadii aad shaki ka qabto ku kalsoonaanta ama hadii ay jiraan dhibaatooyin kale dhanka turjumaanka, si dhakhso ah ugu sheeg qofka ku waraysanaya. Hadii dhibaatooyin is fahmi waa jiro, waxaad xaq u leedahay in aad weydiisato turjumaan kale.

Qoraal ku saabsan wareysiga afka ah ayaa la sameyn doonaa. Qoraalkan waa in dib loogu turjumaa luqadaada ka dib wareysiga waana in la saxo hadii aad ogaatid wax qalad ah. U fiirso qoraalka isla markiiba si aad u eeg in ay si sax ah u muujinayso sharaxaadaadii inta aadan saxeexin. Hadii aad aragtid khaladaad, u sheeg shaqaalaha BAMF iska markiiba.

Wareysigu ma aha mid dadweyne laakiin hadii aad doorbiddo sidaas dadka kula socda (taageeraha ama qareenka) way kugu soo biiri karaan qolka. Haweenku waxa ay xaq u leeyihiin in ay haween wareystaan, hadii ay rabaan. Fadlan shaqaalaha BAMF u sharax wixii aad rabtid.

? Mudo intee le'eg ayay qaadataa habka magangalyadu?

Mudada habka magan-galyo waxa ay ku xidhantahay arimo badan oo kala duwan waxayna si rasmi ah ugu dhamaataa warqadda BAMF ee go'aanka codsiga magan galyada. Hadii aad go'aansato in aad qaado talaabo sharci ah oo ka dhan ah go'aanka BAMF, habka magangalyo wuxuu si rasmi ah ugu dhamaanayaa dhamaadka dacwadda maxkamadda. Sidaa darteed, habka magangalyo wuxuu qaadan karaa inta u dhaxeysa maalmo ilaa iyo dhawr bilood.

? Go'aanno noocee ah ayay gaadhi kartaa BAMF?

BAMF waxa ay leedahay dhawr go'aan oo kala duwan:

Go'aanka wacan: Hadii BAMF kuu ogolaato xaqa magangelyo (Qodobka 16a Jarmalka „Grundgesetz" / „Qaxootinimo" sida ku cad Heshiiska Qaxootiga ee Geneva „„ ilaalin kabis ah „ama" mamnuucid qaran ee ku saabsan tarxiilka „waxa laguu ogolaan doonaa in aad

Jarmalka joogtid wakhti cayiman. Cadayn ahaan, Ausländerbehörde ayaa bixin doonaa ogolaansho degenaansho (marka hore ku meel gaadh ah „Aufenthaltserlaubnis"), ka dibna waxaad haysataa fursad aad ku dalban karto mid aan xadidneyn „Niederlassungerlaubnis"). Kadib go'aanka BAMF, waxa dhacaya „Aufenthaltsgestattung".

Go'aanka xun: Hadii BAMF aysan kugu xidhiidhin mid ka mid ah xaaladahan, codsigaaga waa la diidi doonaa lagana dhigayaa mid „Aan sal iyo raad toona lahayn" („unbegründet") ama „si cad aan sal iyo raad toona u lahayn" („offensichtlich unbegründet"). Hadii wadan kale uu kiiskaaga magangalyo ka yahay mas'uul („nidaamka Dublin") ama uu dal kale hore uu kuu siiyey ilaalin caalami ah, codsigaaga waa la diidi wuxuuna noqon mid „aan la ogolaan karin".

Waxa aad xaq u leedahay in aad talaabo sharci ah ka qaadato go'aanka BAMF maxkamad Jarmal ah. Hasayeeshee, hadii aad go'aansato in aad sidaas samaysid waa in aad si dhakhso ah talo uga heshaa qareenkaaga sababtoo ah wakhtiga laguu ogolyahay in aad sidaas sameeyso waa mid aad u gaaban – iyada oo ku xidhan go'aanka 7 ama 14 maalmood. Fadlan eeg sanduuqa boostadaada maalin kasta hadii aad sugaysid go'aanka BAMF sababtoo ah waxa laga yaabaa in aad si dhaqso ah u ficil celisid. Wixii su'aalo ah waxaad mar walba weydiin kartaa xarunta maxaliga ee macluumaadka.

3. XUQUUQDA BULSHADA IYO WAAJIBAADKA KU JIRA HABKA MAGANGELYADA

Waxa aan rabaa in aan barto Jarmalka, yaa iga caawin kara arintan?

- Ilaa go'aan laga gaadhayo codsigaaga magangelyo laguuma ogola in aad kaqaybqaadato koorsada luqadda ama koorsada isdhexgalka (oo ay ku jirto xiisadda Jarmalku). Hasayeeshee, waxa jira ka dhaafitaanno. Waad ka qayb geli kartaaa hadii:
- Ay jirto fursado la heli karo
  IYO

- Kiiskaaga la fili karo ogolaasho joogto ah oo rasmi ah si aad u joogi kartid.
  AMA
- Hadii aad ku jirtay howsha magangalyada in kabadan 9 bilood oo aad ka shaqeyn karto Jarmalka, hadii aad Jarmalka soo gashey ka dib 1-dii bisha Agoosto 2019 oo aad halkan joogtey in kabadan 3 bilood, sidoo kale waad kaqeybqaadan kartaa.
  Dadka aan loo ogolayn in ay ka qayb qaataan waa shakhsiyaad ka yimaada meelaha loo yaqaan „dalalka amniga ah".

  Hadii aad heshid go'aan wanaagsan oo ku saabsan codsigaaga magan-galyo, waxa aad xaq u leedahay in aad ka qeyb qaadato koorsada isdhexgalka. Xaaladaha qaarkood waxa kaloo lagugu waajibin karaa in aad ka qeyb qaadato. BAMF ma bixiso koorsooyinkan. Taa bedelkeeda waxa bixiya ururo madaxbanaan. Koorasyadan waa in aad adigu is qortaa. Waxaad xarunta macluumaadka ee maxaliga ah, shaqaalaha bulshada ama shaqaalaha BAMF ka heli kartaa macluumaadka ku saabsan koorsooyinka la bixiyo iyo suurtagalnimada.

? Sidaan ku heli karaa nolol maalmeedkayga? Miyaan helayaa gargaar bulsho?

- Inta lagu jiro mudada nidaamka magan-galyo waxaad heli doontaa lacag sida waafaqsan Xeerka manfaca magangelyo doonka („Asylbewerberleistungsgesetz", ee loo soo gaabiyo AsylbLG). Hadii aad ku nooshahay xarunta kowaad ee soo dhaweynta, waxaad heli doontaa hoy, cunto iyo – hadii loo baahdo – hu' iyo alaabta nadaafadda. Intaa waxa dheer, waxa aad ka heli doontaa cadad lacag Sozialamt oo aad u kharashgareyn karto sida aad rabto (tusaale ahaan in aad iibsato tikidhada gaadiidka dadweynaha ama aad ku shabato telefoonkaaga), ama lacagtan ayaa laguu siin doonaa voucher ahaan („Gutschein") ama iyadoo lagaaga dhigo manfac aan lacag ahayn („Sachleistung"). Cadadku wuxuu ku xidhanyahay da'daada, xaaladda qoysnimo iyo hadii aad ku nooshahay guri ama hoy la wadaago. Gobolada qaarkood xafiiska bulshada wuxuu ku siin doonaa lacag halkuu kaa siin lahaa manfac aan lacag ahayn. Xafiiska bulshada waxa sidoo kale laga codsan karaa in uu qaabilo kharashaadka dheeraadka ah, tusaale ahaan. alaabta guriga ama

qalabka hore ee loo iibiyo ilmaha dhasha. Hadii la dhimo manfaca, waxaad taageero weydiisataa xarumaha macluumaadka maxaliga ah ama qareen.

Waa sidee daryeelka caafimaad inta lagu jiro habka magangelyada?

- Marka aad timaadid, rugta soo-dhowaynta ayaa mas'uul ka ah daryeelkaaga caafimaad – xitaa kadib baadhitaanka koowaad. Weydii shaqaalaha maxaliga wixii ku saabsan helitaanka daryeelka caafimaadka iyo, hadii loo baahdo, macluumaadka xidhiidka dhakhtarka. Hadii aadan ku nooleyn xarunta kowaad waa in aad tagtaa Sozialamt ka hor inta aanad dhakhtarka u tegin si aad u hesh shahaadada xanuunka („Krankenschein"). Shahaadada xanuunka u qaad xafiiska dhakhtarka. Hadii ay dhacdo xaalad degdeg ah oo ay tahay in daaweyn caafimaad isla markiiba la bixiyo, waxa sidoo kale lagugu daweyn karaa isbitaalka. Dhakhaatiirta waa ku waajib in ay ku daweeyaan.

  Baadhitaan caafimaad oo takhasus waxa keliya ee bixin kara dhakhtar. Uma baahnid in aad ku bixiso kharash dheeraad ah daawooyinka uu dhakhtarku kuu qoray. Magangelyo-dooneyaasha jooga Jarmalku waxa ay xaq u leeyihiin taageero caafimaad hadii ay dhacdo kaar degdeg ah ama xanuun – daaweynta degdega ah („Notfallversorgung"). Daaweyn dhamaystiran oo ku saabsan xanuunada joogtada ahi kuma jiro. Xaalado gaar ah Sozialamt ayaa ku siin kara. Hadii loo baahdo, la hadal shaqaalaha Sozialamt. Sozialamt waa in ay bixiso talaabooyin ka hortag ah oo caymisyada Jarmalka ku taliyaan, tusaale ahaan. talaalka caruurta. Haweenka uurka leh iyo hooyooyinka dhalmada ka dib waxa ay xaq u leeyihiin taageero caafimaad oo dhamaystiran iyo taagerada umulisooyinka iyo dhakhtarada. Waxaad Sozialamt ka codsan kartaa taageero dhaqaale oo lagu iibsado qalabka loogu talagalay ilmaha dhashay tusaale ahaan sida. alaabta caruurta iyo gaadhiga lagu rido ilamaha.

Ma la ii ogolyahay in aan shaqeeyo anigoo magangalyo doon ah?

- Ilaa inta ay tahay in aad ku noolaato xarunta soo-dhowaynta ee ugu horeysa laguuma ogola in aad shaqeyso ama sameyso tababar

shaqo („Ausbildung“). Waxa keliya ee ka reeban hadii kiiskaaga magangalyo uu qaadanayo wax ka badan 9 bilood. Ka dib marka aad u guurto degmo ku taal Sachsen-Anhalt iyo sadex bilood ka dib marka aad degto Jarmalka waad shaqayn kartaa. Ausländerbehörde waxay ku siin kartaa ruqsadda shaqada („Beschäftigungserlaubnis“) ka dib marka aad dalbato sidoo kalena muujiso warqadda aqbalaadda shaqada ee loo shaqeeyaha ama meeleynta tababar. Ausländerbehörde ayaa markaa eegi doona xaaladaha shaqada (mushahar iyo shuruudo shaqo), kadibna waxay ku siin karaan ogolaansho in aad shaqeyso. Tan waxa lagu qori doonaa warqaddaada deganaansho. Si aad u shaqayo/ raadiso shaqo haboon, aqoonsiga dugsiyada dalalka kale iyo digriiyada shaqo waa muhiim. Marka aad timaadid, waa in aad weydiisaa shaqaalaha bulshada ee ka shaqeeya goobta hoyga kuu ah halka laga heli karo xarun macluumaad oo awood u leh in ay cadeyso shahaadooyinkaaga.

? Yaa iga caawin kara raadinta shaqo haboon ama shaqo tababarasho?

- Hay'adda shaqaalaynta maxaliga ee „Agentur für Arbeit“ ayaa kuu sheegi kara shaqooyinka ama barnaamijyada lagu taageero qaxootiga. Jaamacadaha iyo Jaamacadaha Sayniska waxay kuu sheegi karaan barnaamijyada waxbarashado iyo shuruudaha digriiyada. Weydii shaqaalaha bulshada ee ka shaqeeya hoygaaga meelaha ay ka jiraan fursadahani.

? Caruurtaydu ma ku biiri karaan xanaanada caruurta?

- Hadii aanay waajib ahayn in aad ku noolaato xarunta soo-dhowaynta, caruurtaadu waxay xaq u leeyihiin daryeelka caruurta. Waxaad awoodi kartaa in aad ka codsato Sozialamt in ay bixiyaan kharashka. Waa inaad adigu raadsataa meelaynta, laakiin Sozialamt, shaqaalaha bulshada iyo xarumaha macluumaadku waxay kaa caawin karaan raadinta. Goorma ayay caruurtaydu bilaabi karaan dugsiga? Maxay tahay in aan ogaado?

  Dhamaan caruurta jooga Jarmalku waa in ay tagaan dugsiga („Schulpflicht“). Caruurta magan-gelyo doonku ee jooga Sachsen-Anhalt waa waajib in ay sidaa sameeyaan kadib marka loo wareejiyo deg-

mo una uu u guuro halkaas. Waxaad ka heli kartaa macluumaad ku saabsan bixinta waxbarashada xarunta soo dhaweynta ee ugu horeysa. Caruurta waxa la gelin doonaa dugsi hadii ay gaadhaan lix jir ka hor 30ka June. Caruurta waaweyn iyo dhalinyaradu iyadoo ay ku xidhantahay da'dooda iyo waxbarashadoodii hore, waxa lagu meelayn doonaa iskuul / fasal. Waxbarashada khaaska ah iyo fasalada luqadda ayaa jira. Waa in aad la xidhiidhaa Sozialamt iyo sidoo kale xafiiska dugsiga ee gobolka („Landesschulamt"). Weydii shaqaalaha Sozialamt ama xarumaha macluumaadka, iyo sidoo kale shaqaalaha bulshada waxyaabaha ku saabsan arintan. Ilaa inta aad ku nooshahay xarunta soo-dhowaynta ee ugu horeysa caruurtaadu xaq uma laha in ay tagaan dugsiga. Ku biiridda dugsiguse waa suurtagal – taageero ka raadso qareen hadii la diido codsigaaga.

? Ma jirtaa taageero gaar ah oo la siiyo caruurta?

> Ka sokow faa'iidooyinka bulshada ee caruurtaada, Jarmalka ayaa sidoo kale bixiya taageero dheeri ah. Waxa aad ka codsan kartaa kaalmo dhaqaale oo dheeraad ah Sozialamt ka hor inta aanay caruurtaadu tegin dugsiga ama xanaanada caruurta, tusaale ahaan, qalabka dugsiga, safarada fasalka ama taageerada kharashka cuntada.

4. CAWAAQIIBTA SHARCI EE GO'AANKA WANAAGSAN EE KIISKA MAGANGALYO

? Intee in le'eg ayaan joogi karaa Jarmalka anoo haysta aqoonsigayga ilaalineed?

> Hadii aad ka heshay go'aan wanaagsan BAMF, waxa aad xaq u leedahay in aad heshid ruqsadda degenaanshaha (§ 25 Qodobka 1aad ama Qodobka 2aad AufenthG). Waxa laguu ogolyahay in aad joogtid Jarmalka ilaa inta ogolaanshaha degenaanshuhu uu dhacayo. Dadka leh magangelyo ama qaxootinimo waxay helaan ogolaansho joogitaan oo sadex sano ah. Dadka haysta ilaalin kabis ah waxay helaan ogolaansho joogitaan hal sano ah. Laba sano oo dheeri ah ayaa laga yaabaa in la kordhiyo hadii shuruudaha wali la sii buuxiyo. Dadka haysta „mamnuucid qaran ee ku saabsan tarxiilka" (ogolaanshaha joogitaan-

ka ee § 25aad Qodobka 3 AufenthG) marka hore waxa loo ogolaadaa in ay Jarmalka joogaan mudo hal sano ah. Hadii laguu aqoonsado magangelyo ama qaxooti, xaaladani ma sii jirayso hadii mar kale aad noqoto mid uu ilaaliyo dalkiisu, tusaale ahaan. Adiga oo cusbooneysiiya baasaboorkaaga ama hadii aad u guurto dalkaaga. Hadii ay dhacdo khiyaano ama qarista xaqiiqooyin aasaasi ah waxa lagaala noqon karaa iaalinta. Hadii lagaala noqdo, (Widerruf ama Rücknahme) waxa dhici karta in ay BAMF ku wareysato mar kale.

? Maxaa isbadala marka la helo go'aanka wanaagsan ee BAMF?

> Hadii aad heshid go'aan wanaagsan, waajib kuguma aha in aad ku sii noolaato xarunta soo dhoweynta. Marka aad haysato ogolaashahaaga joogitaan waad shaqayn kartaa. Manaafacaadka bulsho kama helaysid Sozialamt ee waxa ku siinaya Jobcenter-ka. Badanaa, waxaad xaq u leedahay in aad ka qeyb qaadato koorsada isdhexgalka taas oo marka hore ku baraysa luqadda Jarmalka. Hadii aadan weli si fican ugu hadlin Jarmalka, waxa laga yaabaa in lagugu waajibiyo ka qeybgalka. Hadii aadan akhrin karin waxna qori karin waxaad xaq u leedahay koorsada alifbeetada. Hadii aad heshay magangalyo ama aqoonsi qaxootinimo, ninkaaga / xaaskaaga iyo caruurtaad waa loo ogolaan karaa in ay u soo guuraan Jarmalka. Dadka haysta ilaalinta kabista ah xaalado kooban ayay suurtagal ugu tahay. Si kastaba ha noqotee, ka hel macluumaadka xarunta macluumaadka maxaliga.

? Ma in aan sii joogaa Sachsen-Anhalt?

> Qofka xaalad ilaalineed haysta waxa waajib ku ah in uu sii joogo Sachsen-Anhalt sadex sano oo dheeraad ah („Wohnsitzregelung") sababtoo ah meesha uu degan yahay waxa mas'uul ka ah maamulka. Ka hor inta aanay dhamaan sadexda sano, u guuritaanka meel kale oo Jarmal ah waxa keliya ee ay suurtagal tahay hadii adiga ama qof qoyskaaga ka mid ahi uu haysto shaqo taas oo u sahlaysa taageerada maaliyadeed ee noloshaada, ama hadii aad heshay waxbarasho ama tababarid. Wohnsitzregelung waa in sidoo kale la qaado si loo suurtageliyo wada noolaanshaha qoyskaaga. Sii macluumaadkan Ausländerbehörde oo ka codso dib ula noqoshada ama dib u dejinta. Waxaad u guuri kartaa gobol kale marka la buriyo qoonday-

nta. Hadii aad jebiso Wohnsitzregelung waxa laga yaabaa in lagaa yareeyo taageerada dhaqaale. Macluumaad dheeraad ah waxa laga heli karaa „Macluumaad ku saabsan Wohnsitzregelung“: www.fluechtlingsrat-lsa.de/eigene-publikationen/.

5. CAWAAQIIBTA SHARCI EE GO'AANKA XUN EE HABKA MAGANGALYO

? Maxaa dhacaya hadii codsigayga magangalyo la diido?

> Hadii codsigaaga magan-galyo la diido, waxa waajib kugu ah in aad ka baxdo Jarmalka ilaa mudada cayiman ee lagu siiyay („Ausreisepflicht“). Laguuma ogola in aad ku sii noolaatid Jarmalka.

? Yaan taageero ka raadsan karaa xiligan?

> Hadii aad BAMF ka heshay go'aan diidmo waxa aad ka qaadi kartaa talaabo sharci una gudbin kartaa maxkamad Jarmal ah. Xaaladan waa inaad si dhakhso ah u raadsato talo qareen. Xarumaha macluumaadka maxaligu waxay kaa caawin karaan raadinta garyaqaanka. Waa in aad markaana sameysatid balan maalmaha xigta oo aad keentid dhamaan dukumiintiyadaada khuseeya. Sadexda bilood ee u horeeya deganaanshahaaga Jarmalka / ilaa iyo inta aad ku khasbantahay in aad ku noolaato xarunta soo dhoweynta waa inaad ogeysiiso Ausländerbehörde hadii aad u safreyso meel ka baxsan aagaaga laguu ogol yahay in aad u socdaashid.

! Muhiim: Si taxadar leh ka akhri macluumaadka ku saabsan talaabooyinka sharci ee suurtagalka ah („Rechtsmittelbelehrung“) dhamaadka warqadda go'aanka. Xaalado badan waxaad haysataa wakhti aad u xadidan si aad u qaado talaabo sharci.

? Kharashka qareenka ma in aan bixiyaa?

> Waa in aad bixiso kharashka balamaha qareenka iyo matalaada ay kaa noqonayaan maxkamadda horteeda. Qiimuhu wuxuu ku xidhanyahay kiiska waxayna noqon kartaa ilaa boqolaal Euros. Qareeno

badani waxay ogolyihiin in lagu bixiyo hafto – kala hadal qareenka arintan ka hor inta aanad weydiisan in ay ku matalaan. Luqadda kulanku waxay ku xidhantahay xirfadaha luqaddeed ee qareenka. Badanaa waxa aad awoodi doontaa in aad keento saaxiib ama xubin qoyska ah si uu u turjumo. Kala hadal shaqaalaha qareenka baahidaada tarjumaaneed.

? Taageero maaliyadeed ma loo heli karaa balanta u horeysa ee qareenka?

> Dadka dakhligoodu yar yahay ayaa sidoo kale waxa la talin kara qareen. Qayb wayn oo mid ah kharashka waxa dabooli kara waxa loogu yeedho „Beratungsschein" oo aad ka heli karto maxkamadda maxaliga („Amtsgericht"). Waxaad maxkamadda ka heli kartaa foomka codsiga iyo macluumaadka ku saabsan. Waxaad sidoo kale weydiin kartaa qareenkaaga arintan. Si aad u codsato „Beratungsschein" waa in aad muujisaa waraaqahaaga ogolaanshaha joogitaanka, warqadda go'aanka BAMF, iyo – hadii aad haysato – dukumeenti ku saabsan dakhligaaga iyo heshiiska kirada gurigaga. Dabadeedna waa inaad qareenkaaga tustid „Beratungsschein" si aad u cadeeyso in kharashka la daboolayo.

? Taageero maaliyadeed ma loo heli karaa matalaadayda maxkamadda horteeda?

> Taageerada maaliyadeed ee kharashka dacwada maxkamaddu („Prozesskostenhilfe") waxay la mid tahay „Beratungsschein" – waa wax la siiyo dadka dhaqaalahoodu yar yahay. Hadii aad buuxiso shuruudaha, kharashka dacwadda (kharashka maxkamadda iyo qareenka) waxa la wareegaya dowladda. Kuwa dakhliga yar ka sokow dacwadu waxay sidoo kale suurtagal ah in la helo „Prozesskostenhilfe". Qareenkaaga ayaa ku siin kara macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan arintan.

Cinwaannada iyo dadka lala xidhiidhayo:

Geschäftsstelle Magdeburg

Schellingstr. 3-4
39104 Magdeburg

0049 391 50 54 96-13/14 od.
0049 391 53 71 281

info@fluechtlingsrat-lsa.de

www.fluechtlingsrat-lsa.de

Büro Halle (Saale)

Kurallee 15
06114 Halle (Saale)

0049 345 44 50 2521

info@fluechtlingsrat-lsa.de

www.fluechtlingsrat-lsa.de

Bogga internetkayaga ka hel macluumaad ku saabsan xidhiidhka xarumaha latalinta, qoraalada macluumaadka, war-saxaafadeedyada iyo wararka ku saabsan dhacdooyinka.

www.fluechtlingsrat-lsa.de

Dieses Projekt wird aus Mitteln des Asyl-, Migrations- und Integrationsfonds kofinanziert und gefördert durch:

EUROPÄISCHE UNION · Europa fördert · SACHSEN-ANHALT · PRO ASYL · UNO-Flüchtlingshilfe

ONEMLI NOT

Qoraalkani wuxuu ku siinayaa guud marka u horeeya laakiinse ma bedeli doono la-talin shakhsiyeed. Ma balan qaadi karno isku dhamaystirnaan. Qoraalkan waxa la sameeyay May 2019. Fadlan u tag xaruntaada macluumaadka maxaliga ama qareenkaaga sida ugu dhakhsaha badan. Waxa aad weydiin kartaa shaqaalaha Sozialamt iyo / ama shaqaale bulsheedka jooga hoygaaga wixii ku saabsan macluumaadka xidhiidhka. Waxa aad ka heli kartaa cinwaanada xarumaha macluumaadka (la talinta habka magangelyada) bogga internetka ee Wakiilka Isdhexgalka Gobolka (www.integriert-in-sachsen-anhalt.de) iyo bogga internetka ee Gudiga Qaxootiga (Flüchtlingsrat Sachsen-Anhalt, www.fluechtlingsrat-lsa.de).

Flüchtlingsrat Sachsen-Anhalt e.V. wuxuu ka shaqeeyaa qirashada xuquuqda qaxootiga iyo hagaajinta xaaladdooda nololeed. Waxaanu nahay urur aan dawli ahayn waxaanuna maalgelin ka helnaa xubnahayaga, deeqaha iyo maalgelinta mashruuca. Waxaanu bixinaa macluumaad waxaanuna kaa caawin karnaa sidii aad ula xidhiidhi lahayd xarumaha macluumaadka iyo qareenada.

Qoraalkan waxa la sameeyay iyadoo lala kaashanayo „Praxisprojekt Migrationsrecht“ ee Martin-Luther-Universität Halle-Wittenberg.